**DOWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

ولاية بونت لاند الصومالية

**RASMIGA**
الرسمية

الجريد

**Sanadka 15-aad. Garowe July 9, 2013**

**Lam.7**

**Faafinta bil walba soo baxda**

جريدة الشهرية

**Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland**

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Ansixinta xeerka Maxkamadda dastuuriga ah**

**Qaybta labaad**
**Xeer**
**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**
**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.Waxba ma leh**

***Sharci Lr 4. ee 09/07/2013, kuna saabsan Ansixinta xeerka Maxkamadada dastuuriga ah ee Dawladda Puntland.***

**DOWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

ولاية بونت لاند الصومالية

**Sharci Lr.4 ee july , 8, 2013,** ***kuna saabsan Ansixinta xeerka Maxkamadda dastuuriga ah ee Dawladda Puntland.***

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

**Markuu Arkay:** Dastuurka Dawladda Puntland

**Markuu Arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/47/2013 ee 06/07/2013

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda Xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Xeerkan soo socda:-**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen xeerka Maxkamadda dastuuriga ah

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqangalka Xeerkani wuxuu noqonayaa wakhtiga Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah ee dowladda puntland, wakhtigaas ka dib ayaa xeerkani dhaqan gal noqonayaa cidkastana ay waajib ku tahay in ay dhowrto kuna dhaqanto.

**Dr.Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOMALIYA

ولاية بنت لاند الصومال

GOLAHA WAKIILADA

مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

*Ref:-* XGGW/DPL/ 47 /2013 **Garoowe, Sabti** Date:- 06/07/2013

**Ku:- Madaxweynaha DPL**

**Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixin Xeerka Maxkamadda Dastuuriga ah**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref **MW/DPS/153/2013** ee May 19,2013 kuna saabsan Xeerka Maxkamadda Dastuuriga ah ee DPL. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Xeerkan. |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada. |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Xeerka Maxkamadda Dastuuriga ah ee Dawladda Puntland.**

**Allaa Mahad Leh**

**Cabdirashiid Maxamed Xirsi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL**

**DAWLADDA PUNTLAND**

**EE SOMALIYA**

ولاية بنت لاند الصومال

**GOLAHA WAKIILADA**

مجلس النواب

# XEERKA

# MAXKAMADA DASTUURIGA AH

***Garoowe, July 07-2013***

# Xeerka Maxkamadda Dastuuriga ah

## Qodobka 1aad

## Aasaasidda Maxkamadda Dastuuriga ah ee Puntland

1. Waxaa la aasaasay maxkamadda dastuuriga oo ay yeelaneyso dawladda Puntland.
2. Xubnaha maxkamadda dastuuriga waxay ka kooban yihiin 9-Garsoore, 5 ka mid ahi waa Garsoorayaasha Maxkamadda sare iyo 4- garsoore oo laga soo xulay dadweynaha.

## Qodobka 2aad

## Magacaabid

1. Afarta xubnood ee ka baxsan xubnaha maxkamadda sare waxaa la magacaabayaa 30 (soddon) maalmood guduhood, marka Golaha Wakiiladdu ansixiyo xeerkan la xiriira dhismaha maskamadda dustuuriga.
2. Afarta xubnood ee ku xusan faqradda koowaad ee qodobkan, labo ka mid ah waxaa soo xulaya Golaha Wakiillada, labada kalana Golaha xukuumadda, waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada.

## Qodobka 3aad

## Xuquuqda Xubnaha la soo xulay

Xubnaha maxkamadda dastuuriga oo laga soo dhex xulay bulshada waxay dhammaan xuquuqda kala mid noqonayaan garsooreyaasha maxkamadda sare.

## Qodobka 4aad

## Shuruudaha Xulidda

1. Garsooraha maxkamadda dastuuriga oo lagu kordhinayo maxkamadda sare waa inuu leeyahay, buuxiyaana shuruudaha ku xusan qodobka 91-aad ee dastuurka Puntland.
2. Garsooraha Maxkamadda Dastuuriga iskuma qaban karo xilka maxkamadda dastuuriga iyo shaqo xeer-dejin, maamul-dawleed ama mihnad qareennimo.

## Qodobka 5-aad

## Xarunta iyo Guddoonka Maxkamadda

1. Xarunta maxkamadda dastuuriga waxay noqoneysaa caasimadda Puntland.
2. Guddoomiyaha maxkamadda sare ayaa noqonaya gudoomiyaha maxkamadda dastuuriga.
3. Kaaliyaha maxkamadda sare wuxuu noqonayaa xoghayaha maxkamadda dastuuriga.

## Qodobka 6-aad

## Dhaar

Dhammaan Garsoorayaasha maxkamadda dastuuriga waxay marayaan dhaarta ku xusan qodobka 132-aad ee dastuurka Puntland, inta aanay bilaabin xilka loo doortay.

## Qodobka 7-aad

## Luminta xubinnimada Maxkamadda Dastuuriga

Xubinnimada Maxkamadda dastuuriga waxaa lagu waayi karaa marka ay sugnaato mid ka mid ah sababaha hoos ku qoran:

b. Haddii ay lumiso shuruudihii lagu soo xulay mid ka mid ah.

t. Geeriyooto ama ay ku dhacdo jirro ay la gudan weydo xilkeeda.

j. Istaqaalo keento lagana aqbalo.

x. Ku xad-gudubto Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo qawaaniinta Dalka.

Kh. Maxkamadi ku xukunto fal-dembiyeed culus

## Qodobka 8-aad

## Bannaanaanta Jago Garsoore

Haddii jago garsoore ama ka badan ka bannaanaato maxkamadda dastuuriga, waxaa lagu buuxinayaa afartan iyo shan maalmood gudahood.

## Qodobka 9-aad

## Awoodda iyo Xilka Maxkamadda Dastuuriga

1. Maxkamadda Dastuuriga ahi waxay awood u leedahay inay buriso, Xeer, Xeer-hoosaad, Wareegto iyo amar maamul gebi ahaan ama qeyb ahaan, sababo la xiriira in uu dastuurka khilaafsan yahay.
2. Go`aan ka gaarista cabasho muwaadin oo la xiriirta tacadi loo geystay xuquuqdiisa dastuuriga ah.
3. Maxkamadda dastuuriga ahi waxay go'aannadeeda waafajisaa Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka kale.
4. Maxkamadda dastuuriga ahi waa inay ku xallisaa khilaafaadka u dhaxeeya hay'adaha dawliga ah sida hadba awoodahooda dastuuriga iyo xilalkoodu kala yihiin.
5. Maxkamadda dastuuriga ahi waxay ka siisaa talo sharci, markii uu Golaha Wakiilladu weydiisto, sida mashruuc sharci oo ay ka doonayaan inuu waafaqsan yahay dastuurka

## Qodobka 10-aad

## Dacwad horkeenidda Maxkamadda Dastuuriga ah

Maxkamadda dastuuriga ah waxaa dacwad dastuuri ah horgeyn kara:-

1. Golaha Wakiillada
2. Golaha Xukuumadda
3. Maxkamadaha caadiga ah

4. Xeer-ilaaliyaha Guud
5. Muwaadin, Muwaadiniin lagu xad gudbay xuquuqdooda dastuuriga ah

## Qodobka 11-aad

## Wareejinta Dacwad Dastuuri ah ee Maxkamadaha caadiga ah,

1. Qareenka Dadweynaha ama dhinaca daneynaya dacwada waxay maxkamadaha caadiga ah ee dacwad lagu qaadayo ka soo jeedin karaa dacwad la xiriirta in xeer ama qaraar leh awood qaanuun uusan waafaqsaneyn dastuurka, isagoo cabasho qoraal ah oo sababeysan u gudbinaya garsooraha qaadaya dacwadda amase isla garsooraha ayaa xafiis ahaan soo jeedin kara khilaafka dastuuriga ah.
2. Garsooruhu wuxuu amar qoraal ah oo sababeysan:
   b) Ku diidi karaa cabashada dhinaca, haddii ay la noqoto in aysan sal-lahayn amase aysan saameyn ku lahayn go`aan ka gaaridda dacwadda, wuxuuna amrayaa in la wado dacwadda.
   t) Ku oggolaan karaa cabashada dhinaca, haddii ay ugu muuqato in ay sal-leedahay amase saameyn ku yeelan karto garniqidda dacwadda amase xafiis ahaan u muuqato khilaafsanaan dastuuri ah, wuxuu gal-dacwadeedka iyo qoraallada ku jira u dirayaa maxkamadda dastuuriga, wuxuuna joojinayaa dacwaddii socotey, tan iyo inta maxkamad dastuuri ahi go`aan ka soo saareyso, kaasoo ay waajib tahay in loo hoggaansamo.
3. Amarka qoraalka ah oo loogu gudbinayo maxkamadda dastuuriga gal=dacwadeedka iyo dokumentiga ku jira, waa in si bayaan ah loogu muujiyo xeerarka caadiga ah oo u muuqdey inay ka soo horjeedaan dastuurka iyo kuwa dastuuriga ah oo u muuqdey in lagu xadgudbey. Nuqul ka mid ah amarka garsooraha waxaa loo gudbinayaa Madaxweynaha, Madaxweyne-ku-xigeenka iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiillada.

## Qodobka 12-aad
## Hab-raac

1. Dacwadaha dastuuriga waxaa lagu dabaqayaa loona qaadayaa habka Maxkamadda Sare u qaado una marto dacwadaha idaariga ah.
2. Dhinacyada dacwaddu khuseyso ka sokow, waxaa kaloo dacwadda ka soo qaybgelaya garyaqaan ka socda xafiiska Garyaqaanka Guud oo matalaya Dawladda iyo Xeer-ilaaliyaha Guud oo ilaalinaya dastuurnimada qawaaninta.

## Qodobka 13-aad
## Go`aan Qaadasho

1. Maxkamadda Dastuuriga waxay go`aannadeeda ku gaartaa aqlabiyad cod hal-dheeri ah.
2. Go`aannada Maxkamadda dastuuriga waa in la diiwaangeliyo, dadweynaha lala socodsiiyo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee dawladda.
3. Xoghayaha maxkamaddu waa inuu go`aannada Maxkamadda Dastuuriga ogeysiiyaa dhinacyada ay khuseyso.

## Qodobka 14-aad
## Xukun

1. Maxkamadda dastuurigu waxay xukun kama dambeys ah ku caddeyneysaa, haddii aysan sal-layn dacwadda la xiriirta in xeer ama qaraar leh awood qaanuun uusan waafaqsaneyn dastuurka.
2. Haddii dacwadda dastuur-jebinta ay qayb ahaan ama gebi ahaan sal-leedahay, waxay Maxkamaddu xukun kama dambeys ah ku caddeyneysaa xeerarka ka soo horjeeda dastuurka. Sidoo kale, waxay caddeyneysaa xeerarka kale oo qayru-dastuurnimadooda ay sabab u noqotey natiijada xukunka maxkamaddu soo saartey.

## Qodobka 15-aad
## La-socodsiinta iyo Faafinta Xukunnada

1. Guddoomiyaha Maxkamaddu wuxuu nuqullo ka mid ah xukunnada Maxkamadda Dastuuriga u kala dirayaa Madaxweynaha Dawladda iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, waxaana dhammaan xukunnada lagu keydinayaa kaalinta maxkamadda si ay ula socdaan dhinacyada ay khuseeyaan. Xukunnada caddeynaya dastuur-jebin waxaa xukuumaddu ku soo saareysaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda 10 (toban) maalmood gudahood marka laga bilaabo maalinta madaxweynaha la gaarsiiyey nuqulka xukunka.
2. Xeerarka la caddeeyey inay qeyru-dastuuri yihiin waxay dhaqanbeel noqonayaan maalinta la faafiyo xukunka caddeeyey inay dastuurka ka soo horjeedaan.

## Qodobka 16-aad
## Burin

Waxaa la baabi-iyey sharci, xeer, qaraar iyo nidaam kasta oo ka soo horjeeda xeerkan amase aan la socon Karin.

## Qodobka 17-aad
## Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynuhu Saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Farole)**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**